

Farriimaha wargelinta iyo digniinta ah



Marka uu jiro dabka kaymuhu, waxaa jira siyaalla badan oo lagu hello macluumaad kaa caawimiya inaad nabadgasho. Waa muhiim inaad ku tashan macluumaadka hal jaho. Siina wad inaad ku tashato dareenkaaga. Dibada ka eeg wax calaamad ah oo dab muujinaya, sida urka qaaca.

Ha isku halayn in farriin moobaylka laguugu soo diro. Dabka kaymuhu wuxuu bilaaban karaa khatarna gelin karaa gurigaaga iyo naftaada daqiiqado gudahood. Inaad horay u sii baxdo ka hor intaan dabku bilaaban ayaa ah xalka ugu fiican.

Heerarka wargelinta waxaa jira saddex nooc oo dabka kaymaha:

1. Talo

Macluumaad guud oo ku sheegaya meesha markaas wax marayaan.

2. Daawo oo wax ka qabo

Dab ayaa kugu soo socda.

Xaalladu waa isbedelaysaa waxaadna u baahan tahay inaad bilawdo in aad talaabo qaado si aad u xafido naftaada iyo qoyskaaga.

3. Digniin Degdeg ah

Khatar ayaad ku jirtaa waxaadna u baahan tahay inaad degdeg talaabo u qaado.

Waxaa ku saamaynaya dabka.

Ku wargelinta dabka kaymaha badanaa sidaas isuguma xigaan. Tusaale ahaan, wargelinta ugu horraysa oo aad hesho ayaa noqon karta Daawo oo Wax ka qabo.


Haddii aad hesho wargelinta dabka kaymaha, waa inaad u aragtaa arrin dhab ah. In aadan talaaba qaadin waxay keeni kartaa dhimasho ama dhaawac ku yimaada naftaada ama qoyskaaga.

Haddii aadan fahmin fariinta, ka raadi caawimo qaraabada, saaxiibka ama deriska.

Fiiri oo dhegayso wargelinta la siiyo xaafadaada, magaaladaada iyo goobaha kugu wareegsan.

Si aad ku hesho wargelinaha iyo digniinaha:

- Daaro raadiyaha baahiya xaalladahaaga degdgeta ah - raadiyaha ABC ee agtaada ah, raadiyaha ganacsiga ah iyo maxadooyinka raadiyaha ee loo qoondeeyey bulshada.
- Booqo cfa.vic.gov.au ama dse.vic.gov.au
- Telefishanka Sky News
- Wac Victorian Bushfire Information Line tel: **1800 240 667** ama adiga oo marayaa National Relay Service tel: **1800 555 677**
- Goobaha bulshadu ka wada xiriirto: twitter.com/CFA_updates iyo CFA Facebook
- Kala soo bax CFA FireReady oo laga hello kuwa moobaylada Smartphones-ka badankood.



Muuqaalka: Waxaad ka helli kartaa digniino iyo talo CFA FireReady

Farriimaha wargelinta iyo digniinta ah

Xaalladaha degdegta ah:

- Waxaa laga yaabaa inaad maqasho dhawaaqa siiriga loo yaqaan Standard Emergency Warning Signal (SEWS) ka hor farrinta wargelinta ee raadiyahaaga ama telefishanka.
- Wargelin telefoon oo digniin degdeg ah ayaa laga yaabaa in loo soo diro moobaylkaaga iyo telefoonka guriga biilka laguugu soo diro. Taas macneheedu waxa weeye haddii aad ku nooshahay magaalada aadna ku safrayso baadiyaha ma helli doontid digniin moobaylka lagaaga soo diro. Nufeembar 2013 taasi waxay isu bedeli doontaa adeeg ku salaysan goob.

Siiriyada Dabdamiska CFA:

- **Siiriga Dab Damiska (siiriga gaaban)** – siiri gaaraya ilaa 90 ilmiriqsi ayaa wuxuu u muujin doonaa in xubnaha CFA ay wax ka qabanayaan shil degdeg ah oo agtooda ka dhacay. Tani uma baahna in bulshadu wax ka samayso.
- **Siiriga wargelinta bulshada (ee la dheereeyey)** – siiri soconaya ilaa 5 daqiiqo ayaa wuxuu sheegi doonaa in la ogaaday inay jirto xaallad degdeg ah oo agagaaraha dadkuna waa inay raadiyaan macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan khatar weyn.

Tusaalayaal caawimaya oo siyaada ah:

- Hayso khariidad muujinaysa agagaarahaaga. Waxaad eegi kartaa khariidada muujinaysa halka dabku ka socdo.
- Xaqiiji inaad haysto raadiye batteri ku shaqaynaya haddii korontadu tagto.
- Haddii aad ku safrayso Fiktooriya dhexdeeda, waxaad u baahan tahay inaad la socoto xaallada. Aad uga feker booqashada dhulka dabku ka kaco maalmaha khatarta dabku jirto.



Muuqaal: Raadiyaha bateriga ku shaqeeya